



ismaamulka san diego



ceelasha geedaha

Ceelasha Biyaha waa qayb kamid ah Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Naqshada Goobta ee Wayn (SSD-BMP) ee loo adeegsado maaraynta biyaha daadka. Ceelasha Geedaha ayaa lagu rakibaa dhismeyaal gaar ah oo ku yaala Ismaamulka si ay gacan uga gaystaan **ka hortaga maadooyinka sunta ah** sida qashinka, daawooyinka bacriminta beeraha, sunta cayayaanka, iyo qaruuraxa soo gala marinnada biyaha daadka roobka kadibna galaaya balida, wabiyada, iyo badwaynta deegaankeena. Gurigaaga waa mid kamid ah dhawr ku yaala Ismaamulkeena oo leh ugu yaraan hal Ceel Geed.



SAWIRKA 1

Ceelka Geedka (Muuqaalka Guud)

Ceelasha Geedaha Waxay Nadiifiyaan Marinnada Biyaheena


Ceelasha Geedahaaga waxaa loo sameeyay inay maadooyinka wasaqda ah ka saaraan biyaha roobka ee kasoo dareera dhismahaaga ilaa heerka u sareeya ee suuragalka ah. Maadaama aad tahay mulkiilaha mid kamid ah dhismeyaashaan, Ismaamulka ayaa kaa doonaaya inaad ka qaybgasho adoo **inad samaynaaya kormeer joogto ah iyo talaabooyinka dayactirka** si loo hubiyo in Ceelashaada Geedku si sax ah u shaqaynayaan.



Diiwaanadeena ayaa muujinaaya inaad haysato ugu yaraan Ceelka Geedka ee dhismahaaga. Si uu kaaga caawiyo joogtaynta Ceelkaan Geedka, **Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ee ismaamulka San Diego** yaa ku siinaaya buugaan xogta si looga jawaabo su'aalaha aad ka qabi karto Ceelasha Geedka iyo sida aad u joogtaynaysa.

Sida Ceelka Geedku U Shaqeeyo

Ceelasha geedaha ayaa daadka ku leexsha ciida ku wareegsan geedka meesha lagu beeray (arag Sawirka 1 aad). Si guud, aagaga ku xeeran Ceelka Geedka waxaa loo sameeyay inay biyaha u sahlaan inay si dabiici ah u raacaan Ceelka Geedka. Caadiyan kadib marka roob badan da'o, biyaha daadka kusoo aruura Ceelka Geedka ayaa miira ciida taasoo ka saaraya waxyaabaha sunta ah biyaha daadka.




NOOCA CIIDA CEELASHA GEEDKA
Ugu yaraan 30'' u jirta dusha ceelka ilaa salka hoose

AAN DAAD BADAN LAHAYN
(Oo baahan yahay)





ismaamulka san diego



waad ku mahadsan
tahay samaynta
qaybtaada si

loo ilaaliyo
marinadeena biyaha



05JUUN2019

ceelasha geedaha

Ceelasha Geedka ayaa sidoo kale yaraysa yareeya biyaha daadka ee galaaya nidaamka biyaha daadka kana hortagaaya fatahaada dusha sare ee ciida. Ceelasha Geedaha ayaa badanaa laga sameeyaa aagaga ku teedsan meelaha lagu socdo, meelaha gaariyaashu ka baxaan, iyo aagaga baakinka si ay u qabtaan una daaweeyaa biyaha daadka ee ka imanaaya meelahaan.

Hel oo Ilaali Ceelkaaga Geedaha



Si aad u hesho Ceelkaaga Geedka, raadi geedaha ku yaala meelaha biyuhu raacaan ayna ku aruuraan salka geed kadib marka roobku da'o. Ceelasha Biyaha ayaa lagu beeri karaa dhulka ama gudadka geedaha kadibna waxaa la dhigi karaa geesaha meelaha lagu lugeeyo, gaariyaashu maraan, iyo aagaga kale ee taaga ah ee ku yaala gurigaaga.

Marka aad hesho Ceelkaaga Geedka, waa muhiim inaad joogtayso. Ku haynta Ceelka Geedka xaalad shaqaynaysa ayaa kaa caawinaysa inaan ilaalino nadaafada marinada biyaha ee deegaankeena. Hoos waxaad ka helaysaa dhawr kamid ah shaqooyinka dayactirka ee u baahan in la sameeyo:

- **Ka saar geedaha dhintay oo ku badal kuwo cusub.**
- **Haddii aad aragto biyo meel fadhiya wax ka badan 24 saac kadib marka roobku da'o, jilci ama badel ciida si aad u fududayso in biyuhu ka dusaan ciida.**
- **Ka saar qashinka ama wasaqda aruurtay ee xiraysa qulqulka biyaha ceelka geedka oo meel ku haboon ku daadi.**
- **Ilinka hore ee ceelka geedka, ama aaga gelintaanka, ilaali sinaanta ama taaga meesha si aad u hubiso in biyuhu galaan ceelka geedka.**
- **Ceelasha geedaha ee dhoobadu ka ag dhaw dahay salka geedka, ka ilaali in dhaabodu toos u taabato salka geeska si aad uga hortagto jeermiska.**

Si aad u hesho liiska shaqooyinka kale, ka fiiri foomka xaqiijinta dayactirka ama qorsheyaasha dayactirka ee ka yimaada ee shirkada dhistay gurigaaga.

Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ayaa kormeer muuqda ku sameeya Ceelasha geedaha mararka qaar. Ku fashilmida shaqooyinka lagu taliyay ee dayactirka Ceelkaaga Geedka ayaa keeni karta fashilka shaqada Ceelka Geedka waxayna keenaysaa in baaritaan lagu sameeyo goobta.

Haddii aad qabto su'aalo, Nagalaso Xariir:

Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha

1-858-495-5323

BMP.Program@sdcounty.ca.gov

www.sandiegocounty.gov/stormwater

